# Qaybta Naafada Korriinka

# Khayraad Adeeg oo Cusub

Luuliyo 2025

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.

## Kormeerka Dayactirka Caafimaadka

Dukumeentigan wuxuu u adeegaa sidii khayraad loogu talagalay bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, ka-qaybgalayaasha, ilaaliyeyaasha sharci, iyo/ama xubnaha qoyska, si ay u fahmaan hababka adeegga, shuruudaha u-qalanka, iyo xaaladaha lagama maarmaanka ah ee qofka u saamaxaya inuu noqdo bixiye adeegga Kormeerka Daryeelka Caafimaadka.

HMM (Kormeerka Daryeelka Caafimaadka) waxa uu ku lug leeyahay kormeerka caafimaadka shakhsiga ah iyo ururinta xog caafimaad si loo horumariyo maareynta, daryeelka, iyo taageerada xaaladaha caafimaad ee daba-dheeraada. Adeeggan waxa lagu fuliyaa iyadoo la adeegsanayo tignoolajiyada isgaarsiinta elektarooniga ah oo si fog ah ula socota calaamadaha muhiimka ah ee ka qaybgalaha, xogtiisa biometric, ama xogtiisa dareenkiisa ku salaysan. Ka-qaybgalayaasha helaya HMM waa inay si joogto ah ula socdaan dhakhtar daweynaya, kaaliye dhakhtar (PA), ama kalkaalisad caafimaad oo heer sare ah (APRN).

### Ka qaybgalaha Adeega

Ka-qaybgalayaasha ku jira barnaamijka HMM waa in ay:

A. Qabaan hal ama in ka badan xaalado daba-dheeraada (tusaale: dhiig-karka ama macaanka);
B. Halista ugu jiraan caafimaadkooda oo sii xumaada ama dhibaatooyin ka dhasha;
C. Oggolaadaan ka-qaybgalka isla markaana fahmaan ujeeddada kormeerka; iyo
D. Inay diyaar u yihiin inay raacaan jadwalka kormeerka iyo inay ka jawaabaan la-socodka bixiyaha adeegga.

### Sida ay U shaqayso

A. Ka-qaybgalaha iyo/ama ilaaliyihiisa sharci, iyo xirfadlaha caafimaad ee qoro daawada, ayaa codsada HMM.
B. Isu-duwaha Adeegga (SC) wuxuu bixiyaa liiska bixiyeyaasha Medicaid-ka ku qoran ama wuxuu siiya macluumaad ku saabsan sida loo noqdo bixiye Medicaid ah.
C. Xirfadlaha caafimaad wuxuu akoon ka sameeyaa bixiyaha Medicaid ee la doortay si uu u helo xogta caafimaad ee ka-qaybgalaha.
D. Ka-qaybgalaha wuxuu isticmaali doonaa qalab sida cabbiraadda cadaadiska dhiigga, glucometer (qalabka cabbira sonkorta dhiigga), ama qalabka la xidho si uu u ururiyo xogtiisa caafimaad.
E. Xogta waxaa loogu gudbiyaa xirfadlaha caafimaadka iyada oo loo marayo isku-xir ammaan ah.
F. Bixiyaha adeegga ayaa dib u eegaya xogta si uu u qiimeeyo xaaladda bukaanka, u sameeyo wax ka beddel lagama maarmaan u ah qorshaha daaweynta, isla markaana uu siiyo jawaab-celin ka-qaybgalaha iyo/ama ilaaliyihiisa sharci.

Haddii aad rabto xog dheeraad ah, kala xiriir Isu-duwaha Adeeggaaga (SC).